

Sideen ayaan ugu heli karaa guri Old Church Court Street?

Waxaad u bahan tahay inay ku soo gudbiyaan Adeegga Bulshada ee Enfield (Enfield Social Services). Waa inaad qabtaa naafo waxbarasho iyo inaad laftaada ku noolaan kartid gurigaaga ayadoo lagugu taageeraayo. Marka uu guri ka soo baxo Old Church Court, waxaa lagugu marti-qaadaaya inaad soo eeg-eegto sarta. Waxaad la hadli kartaa shaqaalaha halkaas jooga si aad u eegtid in adeegu kuu fiican yahay. Haddii aad jeclaato waxaad halkaas ku aragtid, waxaad samayn kartaa codsi. Haddii uu foomkaagu uu guul noqdo, hawlwadeenka Guriyeenta SPH ayaa kaa taageeri doona soo guurida iyo dejinta.

Waxii macluumaad ah ee ku saabsan soo gudbinta fadlan la xidhiidh:

Origin Housing (Guriyeenta Origin)
Waaxda Xannaaneynta iyo Taageerida
(Care and Support Department)
Joy Margaret Samaroo LD Services Manager
8 Nora Leverton Court
Randolph Street
London NW1 OTS
Tel: 0207 284 5488
Fax: 0207 2841776

Email: joy-margaret.samaroo@sph.org.uk

Great homes,
positive people,
strong communities

origin HOUSING

Old Church Court

Madax banaaneynta dadka waaweynee waxbarashadu ku adag tahay naafo darteed ee ku nool xaafada Enfield



Great homes,
positive people,
strong communities

origin HOUSING

Waa maxay Guriyeenta Taageersan?

Guriyeenta SPH waxay bixisaa guriyeenta taageersan, dadka ay ku adag tahay waxbarashadu naafo darteed ee degan Old Church Court Enfield.
Waxuu ku saabsan yahay barashada ku nololka madaxbanaan.

Guryaha ku yaal Old Church Court

Dhawaan ayaa dib loo qurxiyey – guryo 1qol oo leh jiko/ madbakh, qol fadhi iyo suuli ama masqul. Guryaha oo dhan waxay leeyihiin jaranjaro.



U lugaynta adeegyada xaafada.

Beerta wayn waxaad u socanaysaa	2 daqiiqo
Tembalka	1 daqiiqo
Barkadda dabaasha	10 daqiiqo
Tareenka	5 qadiiqo
Maktabadda	10 daqiiqo



Waa maxay taageerada aan heli doono?

Waxaad shaqaalaha xirfadaysan iyo saaxiibtinimada leh ee SPH ka helaysaa taageerid, kuwaas oo degan isla xaruntan.



waxaad cod ku leedahay wax qabadka aanu fidino iyo nooca taageerada aad hesho. Waxaa kani lagu magacaaba qorshaynta bartame-u-ah-qofka .

Tusaaale ahaan waxaan kaa caawinaynaa:

- Taageerida dalbashada kaalmada guriyeenta, deeqyo iyo kaalmada DSS.
- Taageerida la xidhiidha degida ama ku xasilida gurigaaga cusub
- Taageerida qiirada
- U gudbinta adeegyada taageerida jaaliyadaha ee xaafadda
- la shaqaynta ururyada ka mid ah Adeegyada Bulshada
- Taageerida ku sii haynta xidhiidhka reerka, saaxiibada iyo adeegyada kale ee gargaarka fidiya
- Taageerida xirfad ku noololka madaxbanaan



Wagtiga iyo meesha ku-lankaba waxaa la qaban-qaabiyaa si ay u qanciyaan baahidaada

Faalooyinka ka yimid dadka ku nool Old Church Court

Salvin

“Waa guri wanaagsan, waxaad ku dareemaysaa nabadgelyo Old Church Court”

“Haddii aan ku bilaabo, waan u darsaday gurigii hore laakiin waan ku faraxsanahay gurigayga, waxaan dareemayaa inaan masuuliyad ka badan u dareemo naftayda”

“Waan ka helay halkan, waana u horumar naftayda”



Tony

“Aad bay u fiican tahay – waanan la qabsanayaa”

“ Gurigani wax weyn ayuu ka bedalay naftayda laakiin waa meel fiican”

“Shaqaaluhuna aad iyo aad ayay ugu fiican yihiin caawinta”

“Ilaa hadda xaaladu way fiican tahay. Aniga iyo qofka ila noolba waxaan hore u eegaynaa ciidda masiixiga oo aan isla qaadayno iyo ku noololka gurigan cusub”



Guryuhu waxay leeyihiin qalabka oo dhan oo ka mid ah makiinadda cunto karinta, qaboojiyaha, kaarbad, sariir, miis, kuraasyo iyo kursigii fadhiga.

Waxaa ku yaal beer ay dadka oo dhani wada isticmaali karaan.

Guryuhu waxay u dhow yihiin gaadiidka dadwaynaha iyo dukaano badan.